


Qofka covid-19 ku dhacay ee weli dhibaatooyinkiisa qaba



Ku qofka covid-19 ku dhacay

Dadka covid-19 ku dhacay waxa ku dhici karta in cudurku ku reebo dhibaatooyin kale. Waxa dhibaatooyinkaasi ku dhici karaan dadkii sida weyn u xanuunsaday ee la dhigay cisbitaalka, iyo dadka si khafiif ah u xanuunsaday ee guriga joogay.

Dhibaatooyinka dadka ku yimaada isku mid maaha, laakiin waxa ka mid ah in la dareemo caajis iyo daal, xasuus-xumo ama in qofku dareemo murugo iyo niyadjab. Dadka qaar waxay dareemaan neefta oo ku cuslaata, dad kale waxa xanuuni kara kalgoysyada iyo laabta, qufac ama dareenka urinta iyo dhadhanka oo yaraada.

Waa wax caadi ah in infekshanku keeno dhibaatooyin noocaas, islamarkaana wakhti ayay qaadan kartaa in laga baxo.

Dadka qaarkood ayay dhibaatooyinkaasi ku adkeeyaan in ay ku laabtaan noloshoodii hore, ee guriga, shaqada, iskuulka ama wakhtiga ay firaaqaha yihiin.

Caawimo lagu roonaado

Haddii aad weli dhibaatooyin dareemayo marka 12 toddobaad ka soo wareegtay markii covid-19 uu kugu dhacay, waxaad codsan kartaa in lagu siiyo caawimo aad ku raysato.

Caafimaadku ma ku imanaya inaad nasato, laakiin haddii aad tababbar samayso waxaad si tartiib-tartiib ah ugu laabanaysa firfircooniidii iyo hawlihii caadiga ahaa. Waxa ka mid noqon kara firfrcooni aad keligaa samayn kartid, ama in lagugu caawiyo barnaamij tababbar ah oo ka jira degmada aad deggan tahay.


Dadka qaarkood waxay u baahan karaan in ay joogaan goob ay ka shaqeeyaan khabiirro aqoon u leh dib-u-tababbaridda.

Waa maxay dib-u-tababbariddu?

Dib-u-tababbaridda macnaheedu waa in lagaa caawiyo sidii aad u baran lahayd waxyaalaha aad u baahan tahay si aad u qabsan karto hawl-maalmeedkaaga. Hadafku waxa weeye inaad isku filaan karto ilaa inta suuraggalka ah.

Goorma ayaan la xidhiidhaa dhakhtarkayga?

La xidhiidh dhakhtarkaaga si laguu caawiyo haddii xaaladdu kugu adkaato oo aad caawimo u baahan tahay. Dhakhtarkaaga ayaa eegi doona sidaa laguu caawin karo iyo in aad u baahan tahay dib-u-tababbarid kale.



Akershus universitetssykehus HF

Besøksadresse: Sykehusveien 25, Lørenskog

Postadresse: Postboks 1000, 1478 Lørenskog

Telefon: 67 96 00 00

Epost: postmottak@ahus.no